

Soo Buuxi IUpdate-ka Dib-ugu-Noqoshada Iskoolka ee 2023

Isticmaal iUpdate-ka si aad online-ka uga buuxisid foomam badan oo laga doonayo iskoolka iyo degmadaba!

IUpdate-ka Dib-ugu-Noqoshada Iskoolka ee 2023-24 ayaa furmay August 1, 2023. Inaad xogtaada iUpdate-ka ka cusbooneysid waxay xaqiijin doontaa inaad heshid adeegyadii kugu habboonaa, gaadiidka aad u qalantid iyo xiriirro muhiim ah oo kuugu soo dhacayo boostadaada Mareykanka, taleefankaaga, iimaylkaaga ama farriinta qoran ee taleefanka gacanta. Qoysasku waxay heli doonaan wicitaanno taleefan iyo farriinta qoran ee taleefanka si ay u buuxiyaan iUpdate. Hal waalid/masuul oo ka socda guriga ayaa laga filayaa inuu buuxiyo iUpdate-ka.

Sida loo galo iUpdate-ka:

Waaliddiinta ama masuulka guriga waxay geli karaan Campus Portal spps.org/families si ay u buuxiyaan iUpdate iyaga oo adeegsanayo magaca ay ku galaan One Stop (xarafka 'g' oo ay la socdaan lix lambar, gXXXXXX) iyo ereyada sirta ah. Qoysasku waxay dib ula soo bixi karaan magaca ay bogga ku galaan ama waxay dib u sameysan karaan ereyada sirta ah iyagoo gelayo spps.org/families. Waa inay jiraan cinwaan emayl ama lambar taleefanka gacanta ah kuwaasoo ku qoran diiwaanka ilmahaaga ee iskoolka yaalla.

Qoysaska ku cusub SPPS waxay magaca ay u isticmaalayaan One Stop iyo ereyada sirta ahba ka heli karaan:

- La xiriiridda xafiiska weyn ee iskoolkaaga. [Liiska Iskoolka ee Magacyada Shaqaalaha](mailto:onestop@spps.org) iimayl oo aad u qortid onestop@spps.org oo ay ku jiraan magaca waalidka/mas'uulka, magaca ilmaha, iyo iskoolka ilmaha
- Wixii xog dheeraad ah iyo hagid ah, fadlan booqo spps.org/families

Iyagoo isticmaalayo iUpdate, waaliddiinta iyo mas'uuliyiinta qoysaska waa inay:

- Cusboonaysii xogta qoyska iyo meesha laga la soo xiriiri karo (lambarka taleefanka, iimaylka, iyo cinwaanka guriga) si loo xaqiijiyo inay helaan xogaha muhiimka ah ee loogu diro boostada Mareykanka, taleefanka, emaylka ama farriinta qoraalka ee taleefanka.
- Soo sheeg guriga, cinwaannada kale, ama cinwaanka xannaanada caruurtaada si laguugu diyaariyo baska iskoolka.
- Soo buuxi foomamka loo baahan yahay sannad walba, oo ay ku jiraan Heshiiska Isticmaalka Tiknoolajiyadda - Technology Use Agreement (oo ah isticmaalka iPad ee ardayda), safarka gaaban ee waxbarasho iyo foomamka oggolaanshaha warbaahinta.

**iUpdate
wuxuu
furmayaa
August 1**

**Caawinaad ma rabtaa? Wac 651-603-4348
ama iimayl u dir familysupport@spps.org.**



Saint Paul
PUBLIC SCHOOLS